

# DOODDA WAXBARASHADA

DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

&

DOWLADDA FEDERALKA SOOMAALIYA

WARBIXIN

# MAXAY ISKU HAYAAN DOWLADDA PUNTLAND & DOWLADDA FEDERALKA SOOMAALIYA?



©

@MadashaHaldoor
Garoowe, Puntland Soomaaliya
#DooddaWaxbarashada

Xuquuqda qoraalkani waa mid furan, lagama ganacsan karo, waa qoraal si bilaash ah loogu talo galay. Waa aad dheegan kartaa, xigan kartaa, guurin kartaa, una rogan kartaa qaabab kala duwan adiga oo aan beddelayn micnaha xuruufta, weedhaha iyo tuducyada.

**MADASHA HALDOOR**
DOODDA WAXBARASHADA

**PROF. SENATOR JURILE**
MARTIDA DOODDA

# TUSMO

BOGGA


| | |
|---|---|
| Waxbarashada Soomaaliya Xorriyaddii Ka Dib (1960 - 2020) | 4 |
| Waxbarashada Soomaaliya Xornimadii Ka Hor (1960) | 4 |
| Waxbarashada Dalka Marxalladii Burburka Ka Dib | 5 |
| Khilaafka Iyo Wada Xaajoodkii Wasaaradaha | 7 |
| Doodda Dawladda Federaalka Soomaaliya | 8 |
| Doodda Puntland Iyo Dadaallada Xubnaha Matala Puntland | 9 |
| **GUNAANAD** | **10** |
| **TALO BIXIN** | **11** |

# WAXBARASHADA SOOMAALIYA XORNIMADII KA HOR (1960)

Wiixii ka horreeyey xornimada xooggagii reer Yurub ee gumastay Soomaaliya innaba kama hirgalin dalka nidaam waxbarasho oo qaabaysan. Dawladda boqortooyada Ingiriis-ka oo gumaysanaysay waqooyiga Soomaaliya (Somaliland) iyo Talyaani-ga oo gumaystay koonfurta Soomaaliya (Koonfurta iyo Puntland) ayaa waxaa ku adkaatay dejinta barnaamij waxbarasho oo lagu jiheeyo wacyiga, garaadka iyo ogaalka bulshadii Soomaaliyeed. Inta badan dadka Soomaalida ah oo u badnaan reer guuraa miyiga ku nool, shaki baahsan oo shacabku ka qabay barnaamijka waxbarasho ee gumaystuhu horgalaha u yahay iyo Soomaalida oo cabsi weyn ka qabay faafinta diinta Masiixi-ga iyadoo loo soo marayo waxbarashada ayaa sabab u noqotay in gumaystayaashii shisheeye dalka ka hirgalin waayaan waxbarsho toos ah oo qaabaysan lehna goobo lagu barto. Sidoo kale, kala duwanaanshaha hannaanka jihaynta bulshada ee labada gumayste ee dalka kala haystay ayaa qeyb weyn ka noqotay in dalka laga hirgalin waayo nidaam waxbarasho oo is-oggol. Si kastaba ha ahaatee, in kastoo ay muuqdeen dadaallo la sameeyey wakhtigii dalku ku jiray dawladii daakhiliyadda, hadana ma jirin waxbarasho lataaban karo oo dalka ka jiray ka hor xornimadii marka laga reebo dhowr dugsi sare oo uu dhisay gumaysiga Talyaanigu intii lagu guda jiray sanadihii xukunka daakhiliga ahaa.

# WAXBARASHADA SOOMAALIYA XORRIYADDII KA DIB (1960 - 2020)

Dawladdii Soomaaliyeed ee dhalatay wixii ka dameeyey 1960kii ayaa mudnaan aad u weyn siisay waxbarashada dalka iyadoo loo aqoonsaday in waxbarashadu “iftiin tahay” aqoon la’aantuna, dhab ahaantii, ay tahay “iftiin la’aan”. In kastoo dadaal aad u fara badan dawladdii curdinka ahayd ay galisay waxbarashada, hadana wax weyn lagama qaban hirgalinta waxbarasho tayaysan oo dalka oo dhan ku baahsan. Dhowr wax yaabood ayaa loo aanayn karaa:

1. *Bulshada Soomaaliyeed oo reer miyi u badnayd oo sababtay in ay dawladda ku adkaato hirgalinta siyaasad lagu gaarsiin karo waxbarashada.*

2. *Nidaamka jihaynta dadka ee ka jiray gobollada dalka oo aad u kala duwanaa ayna garwadeen ka kala ahaayeen gumaystayaashii shisheeye. Waxay ku kala duwanaayeen afka waxbarashada (Englsih iyo Talyaani) iyo manhajka wax lagu baranaayey.*

3. *Awoodda dhaqaale iyo tan maamul ee dawladda oo aad u koobnayd iyo Afka Soomaaliga oo ahaa mid aan qornayn.*

4. *Tirada dadka Soomaaliyeed ee aqoonta casriga ah lahayd oo aad u koobnayd.*

Afgabigii nabdoonaa ee ay ciidanku talada dalka kula wareegeen ayaa durbadiiba ka dhabeeyey hal-hayskii xukuumadihii madaniga ahaa ee ka horreeyey. Kacaankii hantiwadaaga ayaa soo rogay qorshayaal lagu hormarinaayo isla markaana lagu Soomaaliyeynaanyo waxbarashadii dalka. Ugu horraynba, waxa laga bilaabay qorridda Afka Soomaaliga oo lagu guulaystay sanadkii 1972. Dhigaalka afka ka dib, dawladdii kacaanku, iyadoo ka amba qaadaysa qorshaheedii baahsanaa ee loogu magac daray "hanti-wadaagga cilmiyeysan" ayaa waxa la daah furay olalihii ciribtirka jahliga bulshada Soomaaliyeed iyadoo dadka reer miyiga ah lagu baraayey akhrinta iyo dhigaalka afka Soomaaliga. Dedaaladaas ayaa horseeday in ay kor u kacdo aqoonta bulshad Soomaaliyeed, waxaana runii xusid mudan in markii ugu horreysay 1970 xarigga laga jaray Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed laguna bilaabay kulliyado kooban. Si kastaba ha ahaatee, hornarkaan waxbarsho, gaar ahaan tan waxbarashada sare, ayaa inteeda badan ku koobnayd magaalada Muqdisho halka dalka intiisa kale aan lagu baahin adeeegyada waxbarashada. Hanqaadkaas muujiyay ififaalaha wanaagsan, nasiib darro, ma waarin oo waxa curyaamiyey dagaala dagaaladii kala duwanaa ee dalku galay oo aad u wiiqday dhaqaalihii dawladda iyo jamhadihii hubaysnaa oo carqaladeeyey xasiloonidii guud Khalkhalkaas oo soo bilowday dabayaaqadii 1979 ayaa horseeday in dalku ku dameeyo burbur, qax iyo jaahwareer wiiqay dhamaan adeegyadii bulsho ee ay dawladu bixin jirtay.

## WAXBARASHADA DALKA MARXALLADII BURBURKA KA DIB

Qaran jabkii ka dhacay Soomaaliya ee horseeday dagalladdii sokeeye wixii ka dambeeyey 1991-kii oo gabi ahaanba meesha ka saaray dawladdii dhexe ee markaas talada dalka gacanta ku haysay ayaa horseeday in nidaamkii bulsho iyo hannaankii maamul uu guud ahaan burburo. Aafadaas baahsan ayaa saamayn mug weyn u gaysatay adeegyadii bulsho ee dawladu bixin jirtay ayna ugu horreeyso waxbarashada dalka heerarkeedii kala duwanaa. Qalalaasihii ka aloosnaa dalka oo ragaaday iyo is-maan-dhaaf faro badan oo hareeyey sidii loogu heshiin lahaa dib u yagleelidda dawladnimo Soomaaliyeed oo loo dhanyahay ayaa culays dheeri ah, iyo murugsanaan ku abuurtay bulshada Soomaaliyeed rajadii ay ka qabeen dib u curashada dawlad dhexe oo bixisa adeegyadii bulshada ee la burburay qaran- jabkii ka dhacay dalka. Arrintaas, waxay horseedday in haldoorkii, aqoonyahankii iyo miiddii bulshada Soomaaliyeed,

intoodii badnayd, ay ka qaxaan dalka ayna u cararaan qurbaha si ay uga helaan nolol miciin dhaanta tii dalka markaas ka jirtay. Nasiib darro, dhacdadaas waxay badday caruur, dhalinyaro iyo nin-door badan in aysan fursad u helin waxbarasho hufan, tayo leh oo lagu kalsoonaan karo. Dhab ahaantii, dhacdadaasi waxay halis galisay aayahii nololeed ee jiilkii markaas hanaqaadayey.

Sanoda kooban burburkii ka dib, waxa isa soo taray dhaqdhaqaaqyo bulsho oo ay garwadeen ka ahaayeen aqooyahannada, isimidda, ganacsatada iyo dhalinyarada. Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed ayaa waxa dhidibadda loo taagay 1-dii Agoosto 1998-kii iyadoo bulsha weynta Soomaaliyeed ee ku dhaqan deegaannada waqooyi bari Soomaaliya shir loo dhan yahay isugu yimaadeen. Ergooyinkii ku heshiiyey dhismaha maamulkaan ayaa uga gollahaa laba ujeedo oo waaweyn:

**1.** *Dhismaha maamul dawladnimo oo ka hanaqaada deegaannada Puntland kuna soo dabaali kara bulshada ku dhaqan deegaanka nabad iyo xasilooni isla markaana siin kara adeegyo bulsho oo ay ka mid tahay waxbarasho tayo leh.*

**2.** *Raadinta dawladnimo Soomaaliyeed oo loo dhan yahay in mar kale dib loogu heshiiyo.*

Dhismaha dawladnimada maamulka Puntland waxa uu suura galiyey barnaamij waxbarasho oo mar kale ka hana qaada Soomaaliya. Muddadaas 21 jirsatay oo ay Puntland jirtay, arday badan oo Soomaaliyeed oo isugu jira wiilal iyo gabdho ayaa ka aflaxay dugsiyada hoose, dhexe iyo sare ee laga hirgaliyey deegaanka Puntland. Wasaaradda waxbarashada Puntland ayaa hirgalisay nidaam waxbarasho oo leh siyaasad midaysan oo lagu maareeyo, kormeero iyo hannaan lagu qiimeeyo tayadeeda. Sanadkii lasoo dhaafay waxa u fariistay imtixaanka shahaadiga ah ee Puntland tiro arday oo kor u dhaafaysa 14, 000 iyadoo lagu galay imtixaanka wax ka badan 48 aag imtixaan gobollada iyo degmooyinka Puntland oo dhan.

## DOODDA WAXBARASHADA DPL IYO DFS

Waxaa xaqiiq ah in Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed ay dejisay hanaan waxbarasho oo lagu kalsoonaan karo ayna ka markhaati kaceen dhammaan daneeyayaasha waxbarashada. “Ra’isal wasaarre Xassan C. Khayre ayaa iisheegay in isaga iyo wasiir Goodax Barre oo wada jooga uu khadka taleefanka kala hadlay Md. Siciid Deni. Waxa uu ka markhaati kacay in hannaanka waxbarasho ee Puntland uu yahay mid tayo leh oo Soomaaliya tusaale fiican u noqon karta” ayuu yiri Senator Cabdirisaaq Juurile ka yiri madashada dooddad haldoor.

Imtixaanka guud iyo bixinta shahadaadada Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu ahaa mid ka hana qaaday deegaanada Puntland muddo 17 sano ah. Qaadista imtixaanka waxaa barbar socotay bixinta shahaado tayeysan oo laga tasdiiqiyo wasaaradda waxbarashada DFS lagana aqoonsaday in badan oo wadamada caalamka ah gaar ahaan wadamada ardayda reer Puntland ay waxbarashada ka doontaan iyo wadama deeqaha waxbarasho ee caalamiga ah ugu deeqa Soomaaliya. Dastuurka DFS ee qabyada ah, sida ku xusan qodobka 30aad ee ka hadlaaya xaqa waxbarashada waxa uu masuuliyadda hormarinta, tayaynta iyo maareynta waxbarashada saarayaa maamulka goboleedka (federal member state). Sidoo kale, isla dastuurku qodobkiisa 52aad ayaa sheegaaya in DFS iyo DXF ay heshiis is-oggol ah kawada yeelan karaan arrimo badan oo ay ka mid tahay waxbarashadu.

# KHILAAFKA IYO WADA XAAJOODKII WASAARADAHA

Qaadashada hannaanka dawladnimo ee Fedaraalka ah ayaa Soomaaliya ku khasbaysay in heshiis wada shaqayn ah laga gaaro arrimo badan oo farsamo ahaan la murugsan qabyanimada dastuurka DFS. Waxbarashada dalka iyo habraacii loo maamuli lahaa ayaa ka mid ah waxyaabaha heshiiska farsamo u baahan. Wasaaradaha waxbarshada DFS iyo tan maamulka Puntland ayaa heshiisyo dhowr ah ku kala saxiixday arrimaha maareynta waxbarashada Puntland iyo sidii labada dhinac uga wada shaqayn lahaayeen. Hase yeeshee, waxaa aad u baahay khilaaf meel liita gaaray oo soo kala dhexgalay labada dhinac. Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa diidday inay tasdiiqiso shahaadooyinka dugsiga sare ee laga bixiyo wasaaradda waxbarashada Puntland haddii aysan Puntland ka qayb qaadan imtixaanka kama damaysta ah ee ay qaaddo wasaaaradda waxbarashada DFS.

## HESHIISYADII LABADA DHINAC

Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo maamulka Puntland waxaa xiliyo kala duwan dhexmaray heshiisyo laga gaaray maarynta waxbarashada gaar ahaanna arrimaha imtixaannada, shahaadada iyo manhajka waxbarasho ee dawlad goboleedka Puntland. Waxa xusid mudan in heshiiskii dhexmaray Luulyo 2017-kii ee ka dhacay magaalada Garoowe wasaaradda waxbarashada DFS oo uu hoggaaminaayey wasiirkii waxbarashada Md. Abdirahman Daahir Cismaan iyo wasaaradda waxbarashada DGPL. Heshiis kaas ayaa lagu gorfeeyey arrimo la xiriiray dhowr qodob oo kala ahaa:

1. Manhajka
2. Imtixaanka
3. Deeqaha waxbarashada
4. Shahaadada Qaranka

Gorfayn iyo wada hadal dheer ka dib, labada dhinac ee heshiisku dhexmaray ayaa waxa ay isku raaceen:

*A. In Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Puntland ay u madax banaan tahay qaadista iyo maamulidda Imtixaanka mideysan ee deegaanada Puntland.*

*B. In Wasaaradda Waxbarashada Puntland ay Natiijada Imtixaanka u gudbiso Wasaaradda Waxbarashada Federaalka.*

*C. In Wasaaradda Waxbarashada Federaalku ay talo iyo taageero ku yeelato qaadista Imtixaanka Puntland.*

*D. In laga wada tashado sidii loo horumarin lahaa Imtixaanka Soomaaliya.*

Isla heshiiskaas, labada dhinac waxay isla waafaqeen inay lagama maarmaan tahay in ardayda Soomaaliyeed ay helaan shahaado caddayn u noqonaysa ardayda sida saxda ah u dhamaysta waxbarashada dugsiga sare. Iyadoo laga duulayo muhimaddaas ayaa labada dhinac waxay isla qaateen:

A. *In dawladda Federaalka Soomaaliya ay aqoonsan tahay shahaadada Puntland.*

B. *In la hormariyo shahaado midaysan dhanka sugnaanta, naqshada, tayada iyo macluumaadka ay xambaarsan tahay.*

C. *In lagu muujiyo shahaadad federaalka goobta iyo dawlad goboleedka laga bixiyey.*

D. *Laga guuro habka gacan ku qorista shahaadada loona guuro habka casriga ah ee elekronigga ah.*

Isla arrimaha la xiriira shahaadada, ka hor heshiiskii Luulyo 2017-kii, labada dhinac waxay ku kala saxiixdeen 14-kii Oktoobar. 2014-kii isla magaalada Garoowe heshiis ay kala matalayeen RW Abdiweli Sh. Ahmed iyo Madaxweyne Dr. Abdiweli Gaas, in DFS ay aqoonsanayso isla markaana aqbasho shahaadada ay bixiso Dawlad Goboleedka Puntland. Sidoo kale, heshiisku waxa uu dhigayaa in DFS ay u gudbinayso dawladaha deeqaha waxbarasho ee caalamiga ah siiya Soomaaliya qoraal lagu caddaynayo in Puntland ay qaaddo imtixaan midaysan oo DFS ay aqoonsan tahay.

## DOODDA DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Marka laga yimaado heshiisyada kor ku xusan ee ay labada dhinac kala saxiixdeen wakhtiyada kala duwan muddana lagu soo wada shaqaynaayey, waayadaan dambe waxaa aad baraha bulshada iyo saxaafadda Soomaalida u hareeyey khilaaf iyo gooddi u dhexeeya wasaaradaha waxbarashada DFS iyo DGPL. Wasiirka wasaasaradda waxbarashada DFS Mudane Cabdullaahi Goodax Barre ayaa sheegay in ay lagama maarmaan tahay in dalka oo dhan uu galo hal imtixaan oo midaysan ayna soo diyaarisay DFS. Sababaha wasaaraddu ay u doonayso in ay imtixaanka midaysan u qaado waxaa ka mid ah:

1. *In ardayda Soomaaliyeed ay isku xaq yihiin oo ay mudan yihiin in ay hal imtixaan ay wada galaan.*

2. *In aysan daw ahayn in shahaado la wada siiyo arday DFS ay imtixaan ka qaadday iyo mid aysan ka qaadin. Wasiirku waxa uu arrintaan ku tusaaleeyey in wasaaradda waxbarashada DFS aysan "shahaadatul suur" aysan ka marag ka cayn.*

3. *In deeqaha waxbarashada ee caalamiga ah lagu koobi doono ardayda gasha imtixaanka ay qaado DFS.*

4. *In wasaaradda waxbarashada Soomaaliya masuul ka tahay maamulka, diyaarinta iyo qaadidda imtixaanaadka heer qaran.*

## DOODDA PUNTLAND IYO DADAALLADA XUBNAHA MATALA PUNTLAND

Mudanayaasha ku matala dawladda Puntland golayaasha labada aqal ee dawladda federaalka Soomaaliya ayaa door weyn ka qaatay heshiisyadii iyo isu-soo-dhawaanshaha labada dhinac. Prof. Senator Abdirisaaq Jurile, oo Madasha marti ku ahaa kana mid ah mudanayaasha Puntland ku matala aqalka sare ee Soomaaliya, ayaa sheegay in aysan waqti xaadirkaan suurta gal ahayn in la qaado imtixaan midaysan sababo ay ka mid yihiin awadood:

*1. Manhajka, siyaasadda, maaddooyinka iyo buugta dugsiyada sare ee dalka lagu dhigto inay kala duwan yihiin, taas oo u baahan mideyn rasmi ah ka hor intaan la qaadin imtixaan loo wada dhan yahay.*

*2. Xirfadda, kartida iyo waayo-aragnimada dalka ee dejinta, qaadista iyo sixidda imtixaanaadka dugsiyada sare oo aad u yar.*

*3. Sugnaanta, sirnimada iyo amniga imtixaanku waa mid xasaasi ah, in badan oo koonfurta Soomaliya ka mid ahna dawladu gacanta kuma hayso. Puntland ayaa ku doodaysa in kalsoonida lagu qabo imtixaanka ay diyaariso DFS ay aad u hoosayso amniga imtixaanaadka oo liita aawadeed.*

*4. In wadanku Federaal qaatay, hanaanka waxbarashaduna ku dhisnaan doonta hannanka Federaal-ka, waxaana masuuliyaddaha la kala leeyahay iyo kuwa la wada leeyahay dhab loogu qeexi doonaa wada xaajoodyada dambe ee siyaasadeed iyo dhamaystirka qabya qoraalka Dastuurka DFS.*

# GUNAANAD

Soomaaliya waa waddan ka soo kabanaya colaad sokeeye, burbur, dawlad la'aan iyo amni darro. Waa waddan u baahan dib u heshiisiin dhab ah, dib u dhis qaran, wada-xaajoodyo wadar-ogol ah, iyo horu- socosho ayadoo loo marayo mabaadii'da aasaasiga ah ee midnimo qaran, wadaniyad, isfaham guud, xallin khilaaf iyo ka dhawrsanaan wax walba oo xasaasiyad leh. Sidoo kale, waxaa muuqata in waxa la isku hayo ee dhabta ah aan shacabka Soomaaliyeed iyo gaar ahaan shacabka Puntland si sax ama si dhab ah loogu sheegin, sababtoo ah imtixaan in la wada galo waxaa lagu ahaa heshiis sababeysan, waxayna u baahan tahay si yoolka loo socdo loo gaaro, in la qaado tilaabooyin isku xiga sida in guddiyo farsamo oo isku dhaf ah loo saaro, in hanaanka waxbarashada lagu taamayo dhismihiisa laga eego dhanka farsamada, sharciga, waafaqsanaanta halbeegyada caalamiga ah IWM. Hanaankaas oo ay saldhig u tahay maamul-daadejin, hufnaan, isla xisaabta, tayeyn iyo sugnaan kuna dhisan nidaamka federaal-ka ah ee Soomaaliya ku heshiisay.

Dawladda Fedaraalka Soomaaliya iyo maamulka Dawlad Goboleedka Puntland waxa la gudboon inay isfahan waara oo xal loogu helo khilaafka waxbarashada ka gaaraan. Madasha Haldoor oo ka duulaysa dooddaan waxbarashada ee ay qabatay waxay ku talo bixinaysaa:

# TALO BIXIN

1. HIRGALINTA NIDAAM WAXBARASHO OO TAYO LEH: waxaa la gudboon Dawaldda Federaalka Soomaaliya iyo maamulka Dawlad Goboleedka Puntland inay si dhow isaga kaashadaan qaabkii loo hirgalin lahaa hannaan waxbarasho oo tayaysan. Waa inay dawladda Fadaraalku horseeddaa dajinta siyaasad qaran oo loo dhan yahay oo lagu maareeyo qaabka loo wajahayo hirgalinta nidaamkaas.

2. SAMAYNTA GUDDIYO FARSAMO: Si loo daweeyo gunta khilaafka, loona gaaro Isfahan iyo heshiis waara, waxaa lagama maarmaan ah in labada dhinac ay sameeyaan guddi farsamo oo isku dhaf ah oo ka shaqeeya isku soo dhoweynta labada dhinac. Sidaas si la mid ah, waxaa daw ah in la isla garto macaayiir (measures) lagu damaanad qaadayo ixtiraamka iyo fulinta heshiisyada labada dhinac ay isla qaataan.

3. DHAMAYSTIRKA DASTUURKA: Ubucda khilaafka soo noqnoqonaya waxa sal u ah dastuurka qabyada ah ee dalka ka jira. Dastuurku waxbarashada waxa uu ku daray waxyaabaha DFS iyo DXF ay ka wada shaqaynayaan iyada oo aan la caddayn qaabka ay noqonayso wada shaqayntaasi.

4. DHISIDDA GUDDIGA SARE EE WAXBARASHADA HEER FEDERAAL: Si loo jiheeyo hawlaha maamulka imtixaanaadka, manhajka iyo bixinta/tasdiiqinta shahaadooyinka heer Fadaraal, waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo guddiga sare ee waxbarashada oo iyagu hawlahaas farsamo ahaan u idman.



# Prof. JURILE

*Soo jeediyaha Doodda*

Prof. Cabdirisaaq Cismaan Juriile, waa aqoon yahan, xeel dheere cilmiga kiimikada, hormuudkii kulliyadda kiimikada ee Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed (Somali National University - SNU), diblomaasi, bare jaamacadeed dalka iyo dibedda, senator ka tirsan aqalka sare ee Soomaaliya, wasiirkii hore ee Boostada iyo isgaarsiinta, wasiirkii hore ee qorshaynta iyo xiriirka caalamiga ah ee Soomaaliya, xildhibaan hore oo ka tirsanaa aqalka hoose ee golaha shacabka Soomaaliya, ka mid ah aasaaseyaashii Puntland, ka soo shaqeeyey UN-ta, hay'ado caalami ah, dowlado shisheeye gaar ahaan Talyaanniga, waxa uu ka mid ahaa raggii laf dhabarta u ahaa fulinta mashaariicda waaweyn ee dalka sida; garoommada iyo laamiga dheer ee dalka Sisku xira. Madasha Haldoor oo soo casuntay Prof. Jurile si gaar ah oo qiimo iyo qaayo sare leh ayaa ay ugu galladcelinaysaa. Waa uu mahadsan yahay Senator Jurile.



## FAADUMO BISLE

*Xiriiriyeha Doodda Waxbarashada*

Faadumo Maxamed Maxamuud (*Faadumo Bisle*), waa aqoon yahanad, saxafiyad, u doode xuquuqda dumarka weriyeyaasha ah, kana mid ah ururweynaha saxafiyiinta Puntland ee MAP. Faadumo, waxa door weyn ka qaadatay xiriirinta iyo qeybinta intii lagu jiray doodda. Madasha Haldoor, si gaar ah ayaa ay ugu galladcelinaysaa.

# LIFAAQ

# SAWIRRO






















DOODDA
WAXBARASHADA
DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
&
DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
MADASHA HALDOOR
HALDOOR FORUM





# DOODDA WAXBARASHADA

EE U DHAXAYSA PL & DFS